

Ogaysiiska la Kulanka ee Qoyska – Pinworms

Gacaliye Qoys:

Waxa laga yaabaa in uu ilmahaaga ka qaaday **pinworms** Xarunta Head Start/ECEAP. Pinwormsku waa noole dulin ah oo yar yar kaas oo ku nool qaybta habdhiska dheefshiida bini aadamka ee hoose.

Waa maxay astaamuhu? Cun cun daran oo inta dabada ku wareegsan iyo/ama xubinta taranka dumarka. Mar marka qaarna waxa uu ka cawdaa calool xanuun, baaxaa deg habeenkii ah, iyo cadho xiliga maalintii dhacda.

Sidee ayey ku faaftaa? Gudbitaanka ugaxaanta oo dabada ka timaad gacanta taabato, ka dibna afka. Taabashada dharka wasakhaysan, sariiraha ama caruusadaha caruurta. Ugaxaanta pinwormku aad bay u yar yar yihiin oo lama arki karo sidaa darteed si fudud ayay ku faafaan.

Goorma ayey astaamuhu bilaabmaan? 2-6 todobaad ka dib marka uu la kulmo qofka xanuunsan ama alaabta wasakhaysan.

Ma loo baahan yahay ilmaha in guriga lagu hayo? Maya ilamaa ilmuhu uu awoodi waayo in uu ka qaybqaato waxqabadyada.

Haddii aad ka shikido in ilmahaagu qabo pinworms (sida ay muujinayaan calaamadaha xaga sare ku qorani), fadlan wac dhakhtarka ilmahaaga ama bixiyaha daryeelka caafimaadka si loo gaadho baadhitaan iyo daawayn sax ah.

Fadlan ogaysii Xarunta Head Start/CEAP haddii uu ilmahaagu qabo pinworm.

Shaqaalaha: _____ Taleefanka: _____

Xarunta: _____